

Fiican in la ogaado

Ku saabsan jadeeco, qaamowqashiir iyo jadeeco jarmal



Folkhälsomyndigheten

Jadeecada, qaamowqashiirka iyo jadeeco jarmalka aadbaa laysu qaadsiin ogyahay, aadbeyna khatar u yihiin. Waa wax aan caadi ka ahayn maanta Iswiidhan laakin dunida dacalladeeda waa ay ka jiraan. In la tallaalo ayaa canuggaaga looga badbaadin karaa cudurradan.

Jadeecadu waxay keentaa qandho aad u daran, qufac iyo nabarro jirka ka soo baxa, waxayna keeni kartaa cudurro iyada soo raaca sida caabuqa xuub axaleedka maskaxda, caabuqa dhegaha iyo caabuqa sambabaha. Ma jiraan wax dawooyin ah oo ka dhan ah jadeecada, waana ay dhacdaa in uu cudurku keenyo dhimasho.

Qaamowqashiirku waa infekshin gaar ahaan ku dhaca qanjirrada candhuufta, laakin waxaa kaloo ka dhalan kara cudurro soo raaca sida caabuqa xuub axaleedka maskaxda iyo caabuqa maskaxda. Wiilasha wuxuu caabuuq uga dhici karaa xaniinyaha. Ma jiraan wax dawooyin ah oo ka dhan ah qaamowqashiirka.

Jadeeco jarmalku waxay keentaa infekshin khafiif u ah badanaa carruurta iyo dadka waaweyn. Laakiin haddii naag uur leh ay jadeeco jarmalku ku dhacdo waxaa jirta khatar aad u weyn oo keeni karta in uu canuggu ka soo dhacyo ama uu dhasho isagoo aad caloosha hooyada ugu soo dhaawacmay. Ma jiraan wax dawooyin ah oo ka dhan ah jadeeco jarmalka.

Tallaal ku badbaadin

Sida ugu wax ku oolshan ee aad canuggaaga ku badbaadin kartid waa in aad tallaashid. Tallaalka ka dhanka ah jadeecada, qaamowqashiirka iyo jadeeco jarmalku waa mid aad loo soo baaray oo waxtar leh. Dhammaan tallaallada leesku siiyo laamaha caafimaadka carruurta iyo caafimaadka ardaydu maaha kuwo khasab ah waana lacag la'aan, waana lacag la'aan. Ha illoobina in aad iska hubisaan tallaallada badbaadada ee qoyska inta aadan dibadda u dhoofina.

Ma dooneysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?

Haddii aad su'aalo qabtid waxaa mar kastaba lagu soo dhaweynayaa inaad la xiriirto xaruntaada caafimaadka carruurta (BVC) ama qeybta caafimaadka ardayda ee iskuulka

SIDAN AYUU TALLAALKU U DHACAYAA

Tallaalka ka hor

Haddii canuggiinu uu iskuul dhigto waxaa fiican in aad horay ugala sii hadashaan tallaalka. Waxaa dhici karta in ay jiraan waxyaabo oo uu canuggu isweydiinayo, oo uu u baahanyahay in uu isu sii diyaariyo inta aan la gaarin goorta la tallaali lahaa. Haddii aad adigu ka waalid ahaan taageero u baahantid waxaad la xiriiri kartaa kalkaalisada caafimaadka ee BHV-ga canugga (kalkaalisada caafimaadka ee daryeelka caafimaadka carruurta) ama kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka.

Tallaalka

Tallaalka waxaa la iska siinayaa cajirka ama cududa, iyadoo ku xiran da'da canugga.

Tallaalka ka dib


Dadka badankoodu waxba ma dareemaan tallaalka ka dib ama waxaa keliya yara damqata meeshi cirbadda looga muday. Dadka qaar waxay 7 - 12 maalmood ka dib isku arki karaan finan aan sidaas u waaweyneyn iyo qandho.

Haddii aad wax uun ka welwelsantid tallaalka ka dib waa in aad la xiriirtaa kalkaalisada caafimaadka ee BHV-ga canuggaaga, kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka ama laamaha caafimaadka.

BARNAAMISHKA TALLAALIDA OO ISWIIDHAN

Meeshan baa ka arki adiga tallaallada dhammaan carruurta Iswiidhan lagu martiqaado, sida looga hortago cudurada halista.

XARUNTA CAAFIMAADKA CARRUURTA



ISKOOLKA

